abacaad Cusub

Sheekooyin Soomaaliyeed oo dhab ah

Qaybtii 1aad

# DAMAC RAG IYO DAN REER



SH. MOHAMED IDRIS AHMED

PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

PERDANA
LEADERSHIP
FOUNDATION
YAYASAN
KEPIMPINAN
PERDANA

Fo

Sheekooyin Soomaaliyeed oo Dhab ah

——— Qaybtii 1aad ———

# DAMAC RAG IYO DAN REER

SH. MOHAMED IDRIS AHMED

YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA * PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION *

PUSTAKA PERDANA
1013596

PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Copyright © 2009 by Sh. Mohamed Idris Ahmed

*All rights reserved. No part of this book may be reproduced or transmitted in any form or by any means without written permission from the author.*

ISBN

Printed in Turkey
Matsis Global Print Solutions

PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

# TABLE OF CONTENTS


BOGAADIN ........................................................................................................1

HORDHAC.........................................................................................................2

CUTUBKA 1AAD: DAMAC RAG IYO DAN REER!.......................................5

CUTUBKA 2AAD: MURUGO.. IYO MEEL MARAN! - (1)..........................34

CUTUBKA 3AAD: MURUGO... IYO MEEL MARAN! (2) ..........................42

CUTUBKA 4AAD: MURUGO... IYO MEEL MARAN!(3) ...........................50

CUTUBKA 5AAD: HURGUMADII SHALAY MA HILMAAMI KARAA! ....64

CUTUBKA 6AAD: JACAYLNA MA YAQAANE! YUU KU DAGIN! ............74

CUTUBKA 7AAD: AAYE IDIIN KEENI MAAYO!.......................................86

CUTUBKA 8AAD: MALAB & SUBAG.. MAXAA KUGU DHACAY!............99

CUTUBKA 9AAD: GABADHII DERSIGA I SIISAY!..................................109

CUTUBKA 10AAD: JAAMACAD AYAA GUURKAYGI LAGU XIRAY......119

CUTUBKA 11AAD: XEERADA WALAASHAA HA GEDDIN! ..................126

GUNAANAD ...............................................................................................133



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

# BOGAADIN

Waxaan bogaadin halkan ugu dirayaa dhammaan walaalaha sheekooyinkooda ila wadaagey laabtoodana noo furay, aniga iyo akhristayaashaba, kalsoonida ay i siiyeen, in aan kala qayb qaato hammiga iyo culayska ay qaar maalmaha nolosha kala kulmeen.

Waxaan rajaynayaa faallada ama talooyinka aan ka bixiyey sheekooyinkooda in ay wax uun ka faa'iidaan, sidoo kalena akhristayaashu ku cibra qaataan, waayo dhacdooyinka noloshu wey isu egtahay marar badan, oo arrinta qof dadka ka mid ahi ka sheekaynayo, waxaa dhici karta in aad is tiraahdo adiga ayuu kaa sheekaynayaa, weyna dhacday oo dadka qaar ayaa ii soo sheegay in sheekada iyo talooyinka dad kale ku saabsanaa, dhib iyaga haystey ay daawo u noqotay.

Waxaan Ilaahay ka baryayaa in uu dhammaan tawfiiqda na waafajiyo, dariiqa toosan nagu hagaajiyo, aamiin.



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

# HORDHAC

Mahad oo dhan Ilaahay baa leh, Nabad iyo Naxariisina Nebigeenna korkiisa ha ahaato.

Buuggani waa qaybtii 1aad ee silsiladda aan u bixiyey sheekooyin soomaaliyeed oo dhab ah, ilaa haddana aan ka daabacnay 3 qaybood.

Qaybtan wexey markii u horreysey ku soo baxday 2016 Maraykanka, rugta Amazon oo markaa luqadda soomaaliga lagu qori jireyna wey ku jirtaa, waxaanan magaceeda ka dhignay " Damac Rag iyo Dan Reer" oo ah sheekada ugu horreysa buugga.

Waxaa laga yaabaa in la is weyddiiyo magacu meesha uu salka ku hayo. Sheekadu sida aad arki doonto wexey ku socotaa, gabar yar oo 14-15 jirta, nin oday ah gabadha damac ka galay, in kasta oo markaa aaney markaa isu dhigmin haddii dhinacya



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

badan laga eego, da'du ugu hoorayso, dhaqanku ku xigo, dabeecaddu ka mid tahay, waxaana muuqatey in ninka damac rag uun baa qaadayey, gabadha aaney isku meel mari karin.

Reerka gabadha dhalay dan baa haysey, qaxooti ayey ku jireen, odaga reerku wuu xanuunsanaa, dantaas haysey ayey gabadha isaga furdaamiyeen markii odaga damacu qaaday xoolo ku bantookhay.

Waxa dhibku ku dhacay markaa waa gabadhii yarayd ee u dhaxaysey damacii ninka iyo dantii yarayd ee reerkeeda, hal marna arrintaasu kuma dhicine iyada oo aan labaatankii gaarin ayey laba goor arrintaasu ku dhacday, laba guurna sidaa kaga fashilmeen.

Ragga damacu kama dhammaado heer kasta oo uu joogo, laakiin damacaasu in uu meeshiisii dhaco mid raggu wada garto ma aha, oo nin walbaa naftiisa ma qiimayn karo, mana ogaado inta badan, meesha uu geli karo iyo meesha aanu geli karin.

Mana aha arrimaha qoyska keliya, ee arrimaha bulshada oo dhan ayey ka dhacdaa, in qofka damac ka galo gabar ama ganacsi ama jago ama xil, uuna is yiraahdo allaylehee wey kugu



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

habboontahay, waanad geli kartaa, laakiin xaqiiqdu ay si kale tahay oo ay arrintaa kala fogyihiin.

Sheekooyinka buugan ku jiraa waa sagaal, qaar kuwii hore ku jirey daabacaddan cusub waan ka saaray oo buugag kale oo munaasib u ah ayaan u wareejiyey, qoraallo cusubna waan ku daray, intii awood ahna tifaf tir ayaan ku sameeyey, waxaanan rajaynayaa in akhristaha ay raalli geliso waxna laga faa'iido, wabillahi tawfiiq.

Mohamed Idris Ahmed

Ankara, Turkey

6 May, 2023



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

*Cutubka 1aad*

# DAMAC RAG IYO DAN REER!

Qisadan cajiibka ah ee aan u bixiyey ***(Damac Rag iyo Dan Reer)*** waxaa ila wadaagtey gabar walaasheen ah oo bog-gayga ku xidhan.

Sidii aan u bilawnay in aan soo bandhigno sheekooyinka dhabta ah ee ka dhaca bulshada soomaaliyeed, annaga oo isku diyeyna in aan cibrada iyo casharrada ku jira kala soo baxno, qaladaadka bulshada ka dhacayana si sharciga Islaamka ku qotoma u saxno, waxaa si toos ah iigu imaanaya, qisooyin kala duwan, qaar xanuun badan, qaar ku farax geliya, qaar tilmaa-maya bulshadeenu iyaga oo 100% muslimiin ah, sida qaarkood u garab marsanyihiin sharciga Islaamka.

Garab markaas sharcigana waxaa ka dhasha dhibaatooyin badan oo xanuun badan. Subxaanallaahiye, qof walba haddii



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

uurkiisa la furo, waxaa ka soo burqanaya qisooyin yaab badan, oo haddaan qofkii ay ku dhacday si toos ah kuugu tebinayn, isla markaana aadan ka dhadhansanayn qoraalka qofka islurid la'aan dhacdada u werinaya iney xaqiiq tahay, aad u malayn kari lahayd in ay tahay: ( mala awaal) ama (fiction) aan xqiiq ku dhisnayn.

Sheekooyinka qaarkood waxaad moodeysaa (horror movie) (filin argagax leh) oo Hollywood lagu soo jilay, haddii aadan hubsan lahayn oo qisada ka baaraan degi lahayn, qaar ayey igu qaadataa muddo in aanu xiriir toos ah is weydaarsanno, iskuna dayo in aan wax ka xalliyo haddii ay suurta gal noqoto.

(Xiddigaha) ama dadka qisooyinku ku socdaan haddaan wax ka taabto, wey kala duwan yihiin, waxaa ka mid ah rag, dumar, caruur, dhallin yaro, culimo iyo caammo, laakiin qaybta ugu badani waa dumarka, malaha wexey ragga kaga duwan yihiin sida ay dhibaatooyinka iyo dhacdooyinka la soo gudboonaada ugu nugulyihiin, laabtoodana ugu furaan cidda ay kalsoonida ku qabaan ee ay talo iyo tusaale ka heli karaan, halka raggu is adkeeyo ama caloosha xirto, in kastoo ay jiraan dumar ragga ka adkaysi badan. Waa sida aan is leeyahay.



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Qisooyinka i soo gaara ma soo wada bandhigo, sida aan marar badan sheegay, laakiin waxaan ka xushaa kuwa aan is leeyahay - aragtidayda - cibro ayaa ku jirta, ama wexey mudantahay in la qoro oo la daabaco, bulshaduna maanta iyo berriba wax bey ka faa'iidi kartaa.

Aniga laftayda qisooyinka iyo bulshada ku dhex jirkeeda ama ka tala bixinta arrimaha qoyska waxaa iiga kordha aqoon iyo waaya aragnimo badan, heer aan marar badan cilladda ama cudurka garto - sida dhakhtarka - marka qofku arrinta ii sheego rag iyo dumar midkuu yahayba, inta aananba kan kale dhegeysan.

Waaya aragnimadaasi waa midda sabab u noqotay in aan ka mid ahay dadka aaminsan gabdhaha soomaaliyeed in ay ka mid yihiin dumarka ugu qaallisan ee aduunka jooga, bani aadam walbaa qaladaad iyo dacfi iyo dad xun ayuu leeyahay, laakiin waxaan ka hadleynaa, xukunka guud, marka la isku soo hooriyo arrimaha oo dhan.

Mexey ku yartahay adduunka dumarkiisa, soomaalina ku badan tahay, gabar ninkeedu ka maqnaado 5 sano ama 10 sano



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

ama ka badan ama ka yar, iyada oo da' yar, oo haddana dhawrsan oo samirsan oo guri iyo reer haysa!

Mexey ku yartahay dumarka adduunka, soomaalina ku badan tahay, gabar la isugu daro shaqadii guriga iyo shaqadii dibadda, iyo shaqadii kasabka, iyo shaqadii korinta, oo ku sabirsan oo aan calaa cal lahayn.

Mexey ku yartahay adduunka, soomaalina ku badan tahay gabar subixii reerka kala agaasinta, xoolaha foofisa, aqalka dhista, ilmaha yar dhabarka ku qaadda, mid kalena laga yaabo in ay uurka ku siddo, xoolaha raacda, ama baadi ka luntay raad raacda, iyada oo hawlahaas ku jirtana fooshu cidla ku qabato, ilmeheda dhasha, galabtii soo noqota iyada oo wadata, kii hore iyo kii dhashay, iyo xoolihii. Gabdhaha maanta waxaa laga yaabaa in ay yaab la noqoto, laakiin waa sidii dhici jirtey welina wax kaga dambeeyaan miyiga, magaalada si kale uga dhacda.

Sida ay ku sheegtay haweeneydii la odhan jirey Karen Blixen, buuggeeda (out of africa) 1937 : (*Dumarka soomaalida guryohooda Nairobi markaad gudaha u gasho waxaad la yaabeysaa, hannaanka quruxsan, roogagga, gogosha sariiraha ku sharraxan,*



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

*udugga iyo bukhuurka carabta ka kham khamaya, iyaga laftoodu waa kuwo soo dhoweyn fiican, adeeg wanaagsan, hawl kar ah, oo qosolkooda aad mooddo sida gambaleelka maarta ah*).

Haddaba qisadii oo sida gabadhu u werisey aan u soo gudbiyo anoo aan wax badan ka taaban si hadalkeeda iyo dareenkeeda caadiga ah akhristuhu u arko waatan, markii aan akhrinana wixii talo iyo tusaalayn ah ayaan gadaal ka raacineynnaa inshallahu.

***Warqadda gabadhu wexey u qornayd sidan:***

(Asww Sheekh waxaan had iyo jeer akhriyaa qisooyinka aad soo qorto, waxaan jeclaystay in aan qisadeyda oon sannado badan qarsanayey kuu soo bandhigo, waana tan qisadayda:

Sheekh hadda waan weynaadey oo waxaan jiraa 21 sano, waxaan ahay qof dhibaato badan soo martay, waxaan dalka hooyo ee somaliya ka soo tegey aniga oo jira 14 sano, waxaan la socdey waalidkay, waxaan markaa u socona dalka Kenya, waxaan ka soo jeedaa qoys aan taajir ahayn, faqiirna ahayn, oo



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

nolol dhexe iskaga nool, qax ayaanu nahay oo waxaanu wadnaa aabahay oo xanuunsan misana aan socon karin.

Aabbahay waxuu ahaa nin iska shaqaysta laakiin waxaa meesha seexiyey kuwo iimaan laawayaal ah oo dadka masaakinta ah jidka u istaaga, waxa yar oo ay ilmohooda u soo shaqaysteenna ka furta, sidaas ayeyna wax ku gaarsiiyeen oo uu naafo la noqday.

Sheekh waxba yaanan war kugu daaline meeshii aan degganayn ayaan ka soo baxnay, dadku waa la qaxayaa oo dalkii waa burburay, qofba dhinac ayuu u yaacayaa, waxaa la go'aammiyey in aabbe la qaado oo xaggaa iyo keenya daawo looga raadiyo.

Wax aanu diyaarad ku raacno ma awoodin, xilligaasna diyaaraduhu waaba iska yaraayeen, waxaanu soo raacnay gaari weyn oo ay dad badani saaranyihiin, aabbahay waa nin la qaadayo, wax rag ahina annaga qoys ahaan nalama socdaan, waxa ciidaminaya waa aniga iyo hooyaday oo markaa xoogaa tabar dhigtay oo aabbe wax badan baxnaanineysey oo ku dhibtootay, waxayse ahayd qof iimaan badan oo ilaahay samir ugu deeqay,



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

anigana waxay ii soo wadatay in aan caawiyo maadaama aan carruurta ugu weynahay.

Gaariga sheekh dad badan oo rag iyo dumar leh ayaa saaran, meel fogna waa loo socdaa oo xuduudda kenya ah iyo qaxootiyada, dadka socdaalka dheer ayaa kulmiyey oo wexey noqdeen sidii dad hal guri ku wada nool, waa la sheekaystaa, waa la isu jeedaa, waa la is bartay, wexey arkaan aniga oo hooyo caawinaya oo aabbe la haya, si baarrinima lehna ugu adeegaya ilaahay mahaddiis. Waana la ogyahay ilmaha nolosha soomaaliya ku soo hana qaada in uu ka duwan yahay ilmaha qurbaha ku koray, oo fir fircooni dheeraad ah leeyahay, hadduu 14 sano gaarana sida badan waa qof reer dhan lagu aamino wiil iyo gabar midkuu yahayba.

Dadka gaariga nala saaran waxaa ka mid ah nin oday ah oo weyn, Ilaahay baa weyne, oo aabbahay xoogaa ka weyn, diini ka muuqato, kana yimi dalalkaa galbeedka, wuxuuna rabey siduu sheegay in uu gobollada soomaaliya sii daawado ee ma ahayn nin gaariga dani badday ama diyaarad awoodi waayey.

Wuxuu wax badan ku noolaa waddamadan gaalada, waxuuna inta badan arki jirey carruur caasi ah ama aan xuquuqda



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

waalidka aqoon, wuxuuna la yaabbanaa sida aan hooyadey u caawinayo, oo aabbahay u ilaalinayo.

Odaygii waxuu bilaabay in uu nala sheekaysto, aabbe xaaladdiisa naga waraysto, xaggaygana marar badan soo eegayo, waxaan soo soconnaba waxaan soo gaarney xuduudda kenya, dadkiina waa la kala yaacay oo qof walbaa dantiisa ayuu raacday.

Ninkii halkaa kuma harin ee wuxuu bilaabay in uu xiriirka nala wado, reerka caawiyo, hoteelkii xuduudda aan ku degney bixiyo, hooyo ka ag dhowaado, marna iga waraysto, wuxuu u sheegay in uu ka yimi dalka .... ee galbeedka, markii la gaadhey in aanu xuduudda ka soo tagno oo gudaha kenya soo aadno, ayuu sheekada si dhab ah hooyo ugu bilaabay, wuxuuna weydiistey in aniga la i siiyo, aabbana wuu ka xishooday maadaama uu xanuunsanaa.

Hooyo wexey ku tidhi: Gabadhayda weli wey yartahay mana ka tegi karo, wuxuu ku yiri: maya kama tegeysid, keliya ballan ii qaad waxaan rabaa gabadha in aan guursado, ha ii doonnanaato inta aan ka soo noqonayo, sidaas ayuuna hooyo ku



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

qanciyey, wuxuu yiri: hadda waxaan ku laabanayaa dalkii aan ka imi, waanan idin soo xiriirinayaa, lambarkayga ayaan ku siinaya, ballan ii qaad in aad i soo waceyso, iyo war san iyo guddoon ay hooyo isla gaadheen, anigu waxaas warmoog baan ka ahay, aabbena weli hooyo wax kuma taaban.

Hayeeshee ma qarsoonayn in hooyo ninka ka heshay diinta ka muuqata, lana dhacsantahay, waxaan tagnay xeryaha qaxootiga ee Kenya, hooyo waxay arrintii u sheegtay aabbahay, laakiin aabbo muusan ku farxin, waayo waxuu dhahay gabadheenna wey yar tahay, nin kuna wuu weyn yahay, ninka waa aabbahay oo kale sida aan qiyaasayo, haddaanu kaba weynayn.

Hooyo waxeey ku soo hal qabsatay maahmahdii soomaaliyeed *( nin weyn ayaa wax dhiqi kara)* ninkii waa lala xariiray, waxuu bilaabay in uu reerka soo jiito oo lacag ku farraqo, meesha aan joognaana waa xero qaxooti, dadku waa iska baahanyahay, meesha waa ku cusubnahay, reerkii waxay ku baxsadeen lacagtii ninku soo dirayey.

Sheekh wax arrinkii marba heer soo maro, anoo gabar 14 jir ah oo arrimahaasba qaafil ka ah, ayaa reerkii arintii ii soo



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

bandhigeen! waan yaabay wax aan shego ma aqaan, aniga waxaan ahaa dadka markaas soo kacaya, waxaase ii qarsoon oo aan la socdaa wiil wax yar iga roon, oo aan isku xaafad ahayn, wax weynina na dhex marin ee si kore aan indhaha isaga eegno, waxaanan uga soo tegey dalkii hooyo.

Wuxuu ahaa qofkii iigu horreeyey ee aan la hadlo, waxaan ka xiriiri jirney khadka taleefanka, hadduu iga hor imaado lama hadli karo waayo sida loo hadlo ama loo haasawaba ma aqaan, marka aan khadka taleefanka ku wada hadleyno isaga ayaan dhegeystaa hadalkiisa, sidaas ayaanan ku soo kala tagnay.

Sheekh talaa igu caddaatay, waalidkiina wey igu dhaggan yihiin, anna ninkii ay wadeen waan diidey, waxeey i dhaheen kala dooro: far duco ama far habaar! Cirka iyo dhulka ayaa ila wareegtey, waalidkii wuu ii xanaaqey, farxaddii ma lahan, salaanta la igama qaadayo, waxaan is dhahay: adoo duco u jeeda habaar ha qaadan, waxaan dhahay waan oggolahay wax walba oo aad ii soo jeedisaan! Wey farxeen, waa hawl la dedejinayaayee waxaa dhacday ninkii in uu soo hadlo, meherkiina dhaqsiba loo rido.



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Reerkaygu kama fikirin waxa igu dhici kara iyo dhibaatada iiga imaan karta guurkan ay igu qasbeen, ma ogaan ninkan waxa uu yahay, in uu dadka cuno iyo in kale, waxaa dhacday ninkii in uu dhoho waan imaanayaa, wuxuu imaanayaa magaalo ka mid ah magaalooyinka kenya, waxeey go'aan sadeen in la ii diro.

Waxaa la i saaray basaska ka shaqeeya magaalooyinka, waxaa la ii saaray sida alaab, waxaa lala dardaarmay kirishboyga amaba taanboyga qof waliba siduu u yaqaan, malaha waxaa laga baqay in aan fakado amaba aan ku degto tuulooyinka kale, wax lacag ah layma siin, waxaan soo gaarey magaaladii ayada ahayd, ninkii waxuu igu sugayaa busteejada, baskii dadka dhan wey ka degeen, anna kursigaan iska fadhiyaa, markuu i waayey oo uu yaabbanyahay ayuu baskii soo koray, wuxuu arkay anigoon kursigiiba kasoo dhaqaaqin, wuxuu i dhahay: maad soo degtid maxaa kugu dhacay? aniguna waa naxsanahay, ma hadli karo, gacma hayga iyo luga hayga wey gariirayaan, oo waa qaboobeen.

Markaan hadal u celin waayey ayuu gacanta iga so qabtay, wuxuu arkay in dhidid badani iga socdo, misana aan jaraynayo



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

markaa suu i dhahay: ma xanuun baa ku haya? Anigana maba jawaabayo oo dhuuntii baa i qallashay.

Sheekh waxaan soo aadney dhankaa iyo hoteel kii uu sii diyaar-saday! Illeen ninku waaba deg degsanyahay oo wuxuu rabaa wax yaabihii ka dhaxeyey rag iyo dumar, anigana Alley ka tahay, maba joogo, caqli igu filan oo hawlahaa garan karana maba lahayn markaas oo war moog ayaan ahay qaafil iska ah.

Xoogaa yar ka dib waxaan soo gaarney hoteelkii anoo weli jaraynaya, oo cabsi badan qaba, cagahana jiidaya. Qolkii ayaanu nimi. Isaga oon meelna soo mar marin, waxna iska soo horraysiin, ayuu ninkii soo xayd xaytey oo isku deyey xaqiisii in uu xoog ku dhacsado, anna dhanka kalaan u boodey, oo waa diidey.

Ninkii xoog ayuu ii sheegtay, oo waa i diley, laakiin nasiib wanaag waxaa markaa irridka soo garaacay shaqaalihii hoteelka oo raashin sida, markuu ka furay ayaan hoos ka dusey oo bannaanka ku dhacay, anoo argagaxsanna ninkii shaqaalaha ahaa ku idhi: walaal i caawi ninkaan wuu i dilayaa!



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Wuxuu ku yidhi: Adeer waa xaaskaygii ee ka leexo, wuuna i sii garaacay, haddana waxaa soo dhacay taleefankiisa, waa reerkayagii oo malaha weyddiinaya in aan soo gaadhey, wuu qabtay, waan ooyey oo qayliyey, aabbahay ayaa maqlay, wuxuu ku dhahay: gabadha maxaa ku dhacay? Wuxuu yiri: waxba ma jiraane xoogaa ayaanu is khilaafnay, wuxuu aabbe ku yiri: gabadha taleefanka iigu dhiib.

Markaan qabtay taleefanka ayaan aabbahay wax walba u sheegay, waa u calaacalay, waxaan dhahay ima jeclidiin, waad iska kay soo tuurteen, hadda ayaan soo baxayaa, wuxuu dhahay hadda gaari ma lahan ee waagu hakuu beryo, aabbena wuxuu la hadlay ninkii oo ku yiri: war gabar waa la tuug tuugaa ee lama garaaco, ee bal hadda gabadha ii soo dir oo baska soo saar.

Wuxuu ninkii yiri waa yahay, sidii ayuu aroortii baskii ii saaray, markaan reerkayagii ku soo noqday ayaan aad u ooyey waxaan dhahay waad i nacdeen waad iska key fogeyseen, wexey waxbadan isku dayeen in ay i sasabaan, waan iska dhaafay oo waan iska cafiyey waalidkay, ninkiina wuxuu sameeyey in uu waalidkii raali geliyo, oo dhaho mar dambe waxaas camal ma



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

dhacayaan, cudur daarkii waa laga aqbalay wuxuuna aabbe ku yiri: Gabadha hada ayaa 15 wax yar uga dhiman tahay, bal xo-ogaa ka maqnow ha kuu korto oo ha caqliyaysato, laakiin waa nin wax u muuqdaane dhawr bilood ayuu maqnaa ka dibna waa soo noqday.

Haddana sidii oo kale baskaa la ii saaray, waan is fahmi weyney, waan ka soo laabtay, wuu iska noqday, xoogaa ka dib ayuu haddana soo noqday, waaba sidii iyo ka daran, wax is faham ah haba yaraatee ma jiro, waxaan go'aan ku gaarey in aanan ninkaa mar dambe la kulmin, markii saddexaad ee aan maqlay in uu imaanayo, ayaan waalidkii iyo reerkiiba ka soo tegey, waxaan imaaday magaalooyinka waa weyn mid ka mid ah, waxaa loo sheegay meeshaan joogo, wuu i soo wacay isagoo raba in aan la kulmo, laakiin waan ka diidey waxaanan ku iri: adeerow ma kulmi karno, waanan isku rafaadnay, ee iska kay fasax oo i fur waalidkana u sheeg, waayahay buu yidhi, sidaas ayuu igu fasaxay, waalidkiina wax walba u sheegay, ninkii sidii ayey noogu kala dhammaatay, ilaa mantana meel kuma sheego, geeri iyo nolol.



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Sheekh waxaan ahay qof Ilaahay aaminsan, waxaan weydiisan jirey dembi dhaaf in uu iiga dhigo, dhibaatadii i soo martayna aanu mar kale igu soo celin. Adduunyadu waa yaab badan tahay, wixii noolina mar uun waa is arkaane, maalin aniga oo magaalada maraya ayaan waxaan ku arkay wiilkii aan jeclaa, wuu i salaamay anna waan ka qaaday, laakiin aad ayaan u naxsanahay oo meel aan wax uga bilaabo ama wixii igu dhacay uga sheekeeyo ma aqaan, waan isku dhex yaacay, waxaan bilaabay in aan inkiro oo dhaho: ma ku xasuusto, xaaladdaas aan ku sugnaa darteed, wuxuu dhahay: haye waa yahay wuuna iga tegey, waxaanse filayaa in uu yaabbanaa!

Markaan kala tagnay oo aan dib i sugu noqday ayaan wel weley, waxa aan is weyddiiyey sababta aan sidaas u yeelay, laakiin sababta ma garan, aan ka ahayn in aan isku buuqsanaa oo dhibaatadii aan soo maray saamayn ama maahsanaan igu yeelatay, sidaas awgeed ayaan bilaabay in. Aan dib u raadiyo oo wax walba u sheego, laakiin nasiib wanaag ama xumaan ma aanan helin, waanan iska samray alxamdulilah.

Dhawr bilood ka dib waxaa reerkii u soo baxay layn dibadeed, farriin ayey ii soo direen, heblaayo soo bax oo noo imow



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

waxaan aadeynaa dalka hebel oo dalalka reer galbeedka ka mid ah, waxaan ku idhi: aniga dibaddaas ma rabo oo meeshayda ayaan iska joogayaa, wexey dheheen: waad nala qorantahay oo haddaadan iman laynka oo dhan waa naga qarxayaa ee dhaqsi u imow, waan yeelay oo waxaan is iri: waalidkaa dhib ha u keenin, waan u imi, muddo yar ka dibna waan soo dhoofnay, oo waxaan soo caga dhigannay annagoo dhan dalka....

waan iska sabray, bilooyin ka dib waxaa reerkeyga u soo baxay layn dibadeed waxeey i dhaheen soo bax oo noo imaad waxaan rajayneynaa in aan aadno dalka........... waan

ka diidey, waxey i dhaheen leenka waad ku jirtaa hadii lagu waayo laynka anagoo dhan waa naga qarxayaa, waxaan is dhahay waalidkaa dhib ha u keenin waan soo baxay, reerkeyga ayaan iska soo aaday, xogaa ka dib waxaan imaanay dalka .....

Waa waddan aad uga duwan waddankii aan ka nimi, waxaa nala ku soo dejiyey gobol ka mid ah gobollada aadka u qabow oo barafku tuuranyahay, wax dad ahina nooma joogaan, soo-maalida kalena meelo naga fog ayey deggan yihiin.



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Waxaa halkaas reerkayga ku soo dhoweeyey wiil soomaali ah oo waddanka markaa cabbaar sii joogey, oo reerka wax badan ka caawiyey, wuxuu ahaa wiil qurbaha wax badan joogey, reerkiisiina intaas moogaa, wuxuu reer ka dhigtay reerkayga, wuxuu jeclaaday waalidkay, anigana wuxuu bilaabay in uu i daneeyo oo ila sheekaysto, laakiin wuxuu arkay qof sheekadaba ka cabsaneysa, oo qawaaf ka qabta, wuxuu la hadlay hooyaday oo weydiiyey waxa igu dhacay, hooyona wexey u sheegtay wax walba oo i soo maray, waayo wiilka hooyo wey ka heshay.

Wexeyna hooyo bilawday in ay wiilka igu qanciso, ina tiraahdo markaan wey kuu tooseysaa inshallah, wixii hore ayaad ku hilmaameysaa, mar dambena aniga dookhaaga kaasoo fara gelin maayo, ee hooyo waan kuu ducaynayaa ee warkayga yeel, qofkii waalidka warkiisa qaato waa qof ducaysan, waxaan go'aansaday in aan arrinka ka fekero, waayo hooyo wexey iila hadashay markaan sidii qof weyn camal.

Waxaan go'aansaday in aanan hooyaday warkeeda ka hor imaan, waxaan ku iri: ok hooyo macaan, wax walba aad jeceshahay waan samaynayaa, hooyo wexey u sheegtay aabbo iyo



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

wiilkii, laakiin waddanka aan joogno sharcigiisa lagu guursanayo waan ka yarahay, waxaa go'aan lagu gaarey in la igu meheriyo, aan reerkayga la joogo, school kana iska sii wato, ilaa aan ka gaarayo da'da dalkan qaan gaarnimada u qoran.

Waa la joogey, sidii ayaan wiilkii ku wada soconney, muddo yar ka dib reer keenna wexey go'aansadeen in ay gobol kale oo dad qaraabo ahi deggan yihiin u guuraan, kana tagaan gobolkan barafka badan, waana soo guurney dhawr bilood ka dib.

Waxaa dhacday ninkii in uu is beddelo, waxaa meeshii ka baxay wax yaabo lagu yaqaanney markii hore iyo waliba waciddii badnayd, waan weydiiyey waxa is beddelka keenay, laakiin wuxuu iigu jawaabey: maba arko is beddelka aad ka sheekeyneyso, waxuu la soo baxay qeelo badan iyo xanaaq joogta ah, waxaan iska aamuso qeeladii wey sii badaneysaa waan ka daaley qeelo badan iyo xanaaq badan, waxaan go,aan ku gaarey in aan furriin ka dalbado, waan ogahay in uusan wax fiican aheen, laakiin waxaa la dhahay saa rabto haddaa weyso saa kabadin weyso aa la sameeyaa, waan u sheegay go,aan keygii, isna ok buu dhahay, waxuu soo wacay hooyo waxuu u sheegay wixii jira, wey ii timid hooyo, waxeey i dhahday hooyo



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

sax miyaa waxaas? Haa baan dhahay hooyo macaan, waxeey i dhahday wax walbo Alle keenay waa loo sabraa, aduunka waa imtixan, ninkii asaga ahaa waan is deyney, wixii Alle ii qorayna waan ku sabray, salaad kastana Alle ayaan dambi dhaaf iska wey diistaa.

Sheeq wax walba oo isoo maray waan iska illaawey, waxaa dhacday maalin maal maha ka mid ah ayaan wiil aan qaraabo nahay qadka internedka ku arkay, waxeey isku magaalo jogaan wiilkii aan jeclaa, waan weydiiyey wuxuu ii sheegay in uu dalalka galbeedka mid ka mid ah joogo oo mar hore soo galay, waxaan weydiiyey meel aan kala xariiro, wuxuu ii sheegay in uusan hayn laakiin ii soo raadinaayo, wuu iiso helay waan la xariirey, wuxuu igu soo dhoweeyey gacmo furan, wuxuu ii sheegay inuu weli siidii ii yahay, waxaan uga sheekeeyey wixii i soo maray oo dhan, wuxuu ii sheegay waxaas dhan ninkii iga tirtiri lahaa in uu noqon doono, laakiin taasi ma aysan dhicin.

Haddii xoogaa xiriirkayagu socdey waxaa yimi khilaaf badan, iyo in uu ballamaha ilaalin waayo, mashquul badan sheegto, waxaan u sheegay wax yaabaha aan dhibsanayo, wuxuu yiraahdaa waan beddelayaa laakiin waxba iskama beddelaan, in



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

uu ka sii daro maahane, maalin ayaan ka xanaaqey oo isku dhacnay, maalmo ayaan kala aamusnayn, maalinkii dambe ayaan qoraal dheer u qoray, waxaan ku qoray waxyaabo badan oo ay ka mid ahaayeen: aniga iyo adiga waxba nama dhex mari karaan, iga raalli noqo, iyo waxyaabo noocaas ah, wax jawaab ah la iima soo celin, waxaan ogaadey inuuba sidaas ku farax-sanyahay, maalmo badan kama soo wareegin waxaan arkay cin-waan asaga leeyahay oo sawir qof dumar ah saaranyahay, waan yaabay cirka iyo dhulka ayaa ila wareegtey, waxaaba ka sii daran ereyada sawirka ku qoran oo qalbigayga dhaawac gaarsiiyey.

Waana waxa igu kallifay in aan wax badan oo qalbigayga iigu qarsanaa oon weligay qof u sheegin aan kuu soo gudbiyo, waxaanan jeclahay sheekh in aad ila taliso, iina ducayso, mag-acayga waa….. Alxamdulilaahi calaa kulli xaal.

*Gabadhaydaas yar waxaan ugu jawaabey:*

Adeer aad ayaad ugu mahadsantahay kalsoonida aad i siisay, oo qalbigaaga ii furtay, iyo qisada sida aad u soo qortay una faah faahisay. Markaan akhriyey sheekadaada bilaw ilaa dhamaad, waxaan xusuustay xadiiskii Nebiga calayhi salaatu wa salaam ee



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

lahaa: *(ku raalli noqo wixii ilaahay ku siiyo, waxaad noqoneysaa kan adduunka ugu sed badan)* macnuhuna ma aha in aan qofku wax kororsi raadin, ee waa in uu isku dayo waxa Alle u qaybshey in uu wax wanaagsan oo nolol fiican leh ka dhigto, isaga oo ilaalinaya mar walba xuduudaha sharcigu u dejiyey nolol raadinta iyo dhaqanka adduunyadan.

Marka aan isku dayo adeer qisadaada in aan faalla yar saaro, cibrooyinka ugu weyn ee iiga soo baxay waxaa ka mid ah:

1. Reerku markii dani hayso oo baahi iyo saboolnimo la soo gudboonaato waxaa dhacda in ay mararka qaar ilmohooda isku furtaan, iyaga oon wax badan xeerin cawaaqib xumada arrintaa ka dhalan karta iyo hurgumada ay reebi karto, taas oo hadda ka muuqata dhibkii go'aankaas ka dhashay oo dhammi gabadhan yar dusha uga dhacay.
2. Waxaa laga yaabaa waalidku iyaga oo wax bi'iya is lahayn, in ay ilmohooda dhib weyn u geystaan marka ay masiirkooda si jajuub ku jiro uga taliyaan, halka diinta islaamku aaney qabin wax jajuub iyo dirqin la yiraahdo,



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA



- Sh. Mohamed Idris Ahmed wuxuu ku dhashay degmada Qandala, Gobolka Bari, Soomaaliya qiyaasta sanadkii 1957.
- Wuxuu tacliinta hoose ilaa sare ku qaatay Qandala, Muqdisho, Cadan dalka Yaman ilaa 1976.
- 1977 wuxuu tegey dalka Sucuudiga, wuxuuna Qur'aanka Kariimka ah ku xifdiyey Masjidka Xaramka ee Makka, wuxuuna cilmiga sharciga ah ka raacday Culimadii Islaamka ee casrigaas joogtey, waxaana ka mid ahaa: Sh. Ibnu Baaz, Sh. Ibnu Cutheymiin, Sh. Xasan Ayuub, Sh. Sayid Saabiq, Sh. Shariif Cabdinuur, Sh. Cumar Faaruuq, iyo Culimo Kale oo badan.
- Wuxuu shahaadada heerka 1aad iyo 2aad ka sameeyey Jaamacadda American Islamic University, Washington DC.
- Wuxuu ka qayb qaatay dacwada bulshada Soomaaliyeed gudaha dalka iyo dibaddiisa,
- Wuxuu Imaam, Daaci iyo Madaxa Golaha Imaamyada Soomaaliyeed ka noqday dalka Maraykanka, laga bilaabo 1997.
- Wuxuu ka qayb qaatay dacwada iyo dhismaha Masaajidda iyo Maraa kista Qurba joogta Soomaaliyeed ee Maraykanka, Canada, Europe iyo Africa, welina uu safarro kala duwan ku bixiyaa.
- Wuxuu wacyigelin kaga qayb galay shirar badan oo bulshada soomaaliyeed loo qabto gudaha dalka iyo dibaddiisa, wuxuuna qoray kumanaan maqaallo af carabi iyo soomaali isugu jira, iyo kutub ay mid yihiin: Innaga iyo Xabashida, Sh. Ibnu Baaz, taariikh nololeed kooban, Cajaa'ibta sadaqada, Socdaalka Geerida, Miraha kharaar ee Dagaaladii sokeeye iyo qaranjabkii soomaaliya, qisadii horumarka Malaysia, Damac rag iyo dan reer, Hoggaaminta Erdogan iyo Horumarka Turkiga, Jacaylka Dhabta ahi goormuu dhashaa? Iyo kuwo kale oo badan.

ISBN 978-0-9912730-2-7
52000>
9 780991 273027

PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA